

Ballanqaadkayaga Beesha

La-shaqeynta Beesha

Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital iyo Allina Health muddo dheer bay shuraako la ahaayeen cid walba si wax looga qabto baahiyaha caafimaadka ee beelaha an u adeegno.

La-shuraakowga Beesha

- **The Phillips Partnership (Shuraakada Phillips)**
 - Sannadkii 1997, cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital, Children's Minnesota iyo Honeywell ayaa abuuray Phillips Partnership (Shuraakada Phillips). Muddo dhan 20 sanno, waxa ay Shuraakadu maaligalisy lacag ka badan \$1.5 Bilyan taasoo la galayya xaafadda Phillips. Wuxuu ay Shuraakadu dhammaatay sannadkii 2017, waxana socda wadahallo lagu qorsheynayo taageero ah mustaqbalka.
- **Cultural Wellness Center (Xarunta Wacnaanta Caafimaadka) iyo Backyard Community Health Hub (Bar-kalunka Caafimaadka ee Beesha)**
 - [Cultural Wellness Center](#)
 - Muddadii lagu jiray 10-kii sanno ee Backyard Initiative (Mashruuca Xaafadda), Allina Health waxay xidhiidh qoto dheer la dhisatay Cultural Wellness Center, oo ah hay'ad aan faa'iido-doon ahayn oo taageerta beesha iyo sax-ahaanta dhaqanka. Waxa annu hay'adda Cultural Wellness Center ka soo qaadnay inay tahay mid ka mid ah shuraakadayada ugu waaweyn gudaha xaafadda Phillips.



Cultural Wellness Center
Health · Heritage · Harmony

- [Backyard Community Health Hub](#)
 - Iyada oo la marayo Backyard Initiative, waxay Cultural Wellness Center iyo Allina Health la shuraakoobeen todoba xaafadood oo ah koonfurta Minneapolis si deganyaasha looga caawiyo in la fiicneeyo caafimaadka. Hadda iyada oo degan gudaha suuqa Midtown Global Market, waxa ay Backyard Community Health Hub tahay xarun adeegyo iyo illo ah degmada oo ku saabsan firfircoonda, is-daryeelka iyo wacnaanta.
- [YWCA Children's Center \(Xarunta Carrruta ee YWCA\) iyo Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital](#)
 - Muddo ku dhow 15 sanno, Allina Health waxay goob ku deeqday adeegyada sii-haynta carruurta ee [YWCA](#) taasoo ah gudaha dhismaha Wasie Building ee cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital. Dadka ka tirsan beesha iyo shaqaalaha cisbitaalku isku si ayay uga mahadnaqeem in carruurtooda lagu hayo meel u dhow guriga iyo shaqada.


- **Dugsiga Andersen United Community School**
 - Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital iyo rugta maamuulka Allina Health waxay muddo dheer shuraako la ahaayeen deriska degan albaabka nagu xiga, kaasoo ah dugsiga Andersen United Community School. Wuxuu annu taageernaa dugsiga Andersen School iyada oo la marayo saaxiibo buug (book buddies), bixin baasgeel/bushkuleeti, barnaamijka cunta ee dhammaadka todobaad ee la yidhaahdo Every Meal iyo qabanqaabinta safarka sahanka baadiyaha ee sannadalaha ah ee fasalka 6^{aad}.



- **Lake Street Council** (Golaha Lake Street)
 - Golaha Lake Street Council waa isbahaysi aan faa'iido-doon ahayn oo taageeraya ganacsiyada ku dhereran jidka Lake Street. Allina Health waxa ay xubin hay'ad ka ahayd Golaha illaa 2007 waaana ay taageertay iyada oo la marayo deeq-bixin ah samo-fal. Kadib iska-hor-imadyadii bulsho ee Bishii Shanaad ee 2020, waxa ay bixiyeyaasha cisbitaallayda ah ee la yidhaahdo Abbott Northwestern Hospitalist ay lacag dhan \$53,000 ku deeqeen sanduuqa [We Love Lake Street Recovery Grant](#) (Waan jecel nahay Soo-kaabashada Lake Street). Sannadka 2021, rugta maamulka Allina Health waxay goob shaqo aamaahin doontaa Golaha Lake Street Council, markii goobtoodii shaqo ay ku burburtay iska-hor-imadyadii bulsho.



- **Gargaar Waxbarasho oo la Siinayo Beesha**
 - Bishii Kow iyo Tobnaad ee 2020, [Rugta maamulka ee Allina Health waxay goob shaqo ku deeqday The REAL Minneapolis](#), oo ah hay'ad aan faa'iido-doon ahayn oo haqabtiraysa baahiyaha ah waxbarasho ah fogaan ka barasho (distance learning) ee carruurta iyo tobaneeyo-jirka ee xaafad-weynaha Phillips. Carruurta aan haysan Wi-Fi lagu galayo internetka ee laga yaabo inay kaligood joogeen guriga ayaa hadda haysta goob waxbarasho oo ah ammaan oo leh hagid laga helayo isku-duweyaal waxbarasho.




- Laga bilaabo Bisha Laba iyo Tobnaad ee 2020, hay'adda [B.U.O.Y Foundation](#) iyo [North Star Network](#) ayaa bilaabay barnaamij waxbarasho oo loogu talogalay barteyaasha da'da yar kaasoo ah rugta maamulka Allina Health.
- [**South Minneapolis Public Safety Coalition**](#) (Isbahaysiga Ammaanka Dadweynaha ee Koonfurta Minneapolis)
 - Ammaanka bukaankayaga, boqdeyaasha, shaqaalaha iyo beesha ayaa ah waxa leh muhimadda ugu sareysa. Iyada oo la marayo South Minneapolis Public Safety Coalition (SMPSC), Allina Health iyo ganacsiyada degmada iyo deganeyaasha ayaa iskaashanaya in dib looga fikiro ammaanka iyo ku noolaansha Koonfurta Minneapolis. Fiiri qoraalka SMPSC ee la yidhaahdo [Tallaabooinka Ugu Horeeya ee Lagu Gaadhayo Beelo Sii Ammaan Badan](#) si ad dheeraad u ogaatid.

Ficneynta Caafimaadka Beesha

Sannad kasta waxay Allina Health bixisa deeq ah samo-fal iyo deeq waxbarasho kuwaasoo loogu talogalay gobolka ay u adeegto. Lacagaha waxa la siiyaa hay'ado aan faa'iido-doon ahayn oo taageera ficneynta caafimaadka isla markaana adeecsan hadafka, himilada iyo qiimaha Allina Health.

Tobankii sanno ee la soo dhaafay, waxay Allina Health deeqday in ka badan \$20 milyan oo la siiyay hay'ado degan Minneapolis.



Saddexdii sannadood ee kasta, waxa ay cisbitaalada ku yaalla gobolkeena gartaan baahiyaha caafimaadka beesha iyada oo la marayo [Qiimeynta Baahiyaha Caafimaadka ee Beesha](#). Iyada oo ku saleysan wixii laga helay qiimeynta, waxay Allina Health isku dabariday barnaamijyada wax u qabashada beesha oo ay ku jiraan:

- [**Change to Chill™**](#)
 - Adeeg wacnaan caafimaad maskax oo bilaash ah oo ku guulaystay abaalmarin oo ay bixiso qayb-hoosaad ka tirsan Allina Health. Barten internetka ee falcelinta leh waxa loogu talogalay tobaneeyo-jirka iyo qaangaadhka la shaqeeya.



- [Health Powered Kids](#)TM
 - Casharo iyo firfircooni ah dugsiga iyo beesha dhexdeeda oo bilaash ah oo ku saabsan nafaqada, firfircoonda jidhka, sixada iyo isku-dhelitirnaanta maskaxda iyo jidhka



[Guji halkan](#) si ad dheeraad uga baratid Barnaamijyada Fiicneynta Caafimaadka Beesha ee Allina Health.